



## Kormeeraha Guud ee Guerrero ardayga hore uga qalin jabiyay PPS ee J.T. Flowers oo qabtay wada hadalka ka dhacay City Club

Kormeeraha Guud ee PPS Guadalupe Guerrero ayaa ka jawaabay su'aalaha uu weydiinayay xiriiriyaha hadalka ee J.T. Flowers, oo ah Aqoonyahanka Rhodes isla markaana arday hore ka ahaa Dugsiga Sare ee Lincoln High, isaga oo weydiinayay wixii uu bartay afartiisii bilood ee uu shaqada hayay, sida uu qorsheynayo in uu wax uga qabto arrimaha muddada dheer soo jiray, iyo aragtidiisa ku aadan waxa ay degmadu noqon karto. Guerrero ayaa bandhigga ku furay khudbad ka hadlaysa halka uu soo maray ee ka soo bilaabmay isaga oo ah Bartaha Luqadda Ingiriiska ee Degaanka San Francisco Bay iyo Central Valley ilaa uu ka soo gaaray helitaanka laba shahaado oo uu ka qaatay Harvard iyo hoggaaminta dugsiga degmada ee ugu weyn ee Oregon.

Guerrero wuxuu ka hadlay sida ay uga go'an yahay fulinta nidaamyada waxbarashada ee PPS taasi oo lagu aqoonsanayo ardayda maalmaha ugu horeeya ee ay fasallada bilaabaan ee u baahan taageero si loo xaqiijiyo in ay qalin jabin diyaar u yihiin taasi oo loogu talagalay tacliinta sare iyo xirfad.

“Waa in aan raadinaa wax taasi dhaliya,” ayuu sheegay. Taasi waxay u baahantahay in ay bilaabanto waqti hore haddii arday badani ay tahay in guulaystaan oo ay qalin jabiyaan.

“Waa in aan bilowno dhiirigelinta iyo qiimeynta iyo ballaarinta tayada sare ee waxbarashada hore ee dugsiga hortii, sidaa darteed tani waxaan u arkay in ay tahay fursad aan qaar ka mid hoggaan ku deymin karno PPS,” ayuu sheegay. “Waa nidaamka dugsi ee ugu weyn gobolka, wuxuu haystaa fursad uu raad ugu yeelan karo ajandaha gobolka Oregon. Waxaan isla hadab bilownay in aanu shaqadaasi la qabto asxaabteyda.”

Intii lagu jiray wada hadalkii Su'aasha iyo Jawaabta ah ee uu la lahaa Flowers, Guerrero wuxuu sheegay in uu qaatay shaqada Portland sababta oo ah wuxuu arkay bulsho iyo guddi dugsi oo diyaar u ah in ay hore u socdaan iyo fursad “iyo fursad uu isbeddel degdeg ah” kaga sameyn karo degmo meelaha magaalada ah ku taala. Wuxuu uga mahad celiyey bulshada dadaalkoodii ku aadanaa waxbarashada dadweynaha, isaga oo ku baaqay in qof walbaa uu sii wado in uu ku lug yeesho ardayda, ma aha kaliya Portland, ee laakiin Oregon oo dhan.

“Haddii ay yihiin lix dugsi oo degmada ku yaala ama ay yihiin 85, dhammaanteen waxaan la halgamaynaa mawduucyo isku mid ah,” ayuu sheegay Guerrero. “Sidee ayaan u taageernaan ardayda leh dareenka waxbarasho ee bulsho ahaaneed. Sidee dhammaanteen u noqon karnaa kuwo si fiican uga warqaba dhibaatooyin naxdinta leh? Sidee ugu wanaagsan ee aan u taageernaan ardayda kala duwan ee wax bartayaasha ah ee aan horteenna ku aragno? Sidee ugu wanaagsan ee aan ugu qayb gelinaa qoysaskeena?”

Dhacdadu, waxay ahayd mid tigidhadeeda oo dhan la gatay, waxaana ku jiray su'aalo iyo ka qayb qaadashado ay la yimaadeen ardayda dugsiyada sare ee Roosevelt, Madison iyo Lincoln.

Halkan ka fiiri dhammaan barnaamijka:

<https://www.youtube.com/watch?v=0FOAU1KjYdA#action=share>

*-Pamela Jordan*